Y-STOP

# JOOJIN BAADHISTA IYO ILMAHAAGA

HAGE WAALID

## *Sheekada Aamina*

*"Sanadkii la soo dhaafay oo wiilkaygu bilaabay kuliyad ayaa waxaa si joogta lagu bilaabay joojin baadhitaan (stop and search). Xili fiid ah oo uu joogay guriga ayaan waxaan ogaaday inuu xanaaqsan yahay sidaas daraaddeed waxaan weydiiyay sababta. Taasi waxay ahayd markii ugu horeysay ee aanu arintan gurigayga kaga hadlay weligeed. Maadaama oo aanan run ahaantii  waxba ka qaban karayn xaaladda waxaan dareemay si aan fiicnayn.*

*Waxaan jeclaystay inuu joogo guriga wakhti walba si uu amaan uhelo. Waxa uu ii sheegay in wax yaabaha uu kala kulmo booliska ay ku keentay cadaadis badan, ugu danbeyn waxa uu bilaabay sigaarka oo ay aritaasi u ahayd sabab.*

*Ma aanan fahmin sababta ay booliisku si joogta uggu baadhayeen in kastoo aanan marnaba waxba isagu ii sheegin. Waxaan u maleeyey, inay sababtu ahayd saaxiibada uu samaystay. Wadada kulayadiisa cusub uu u mari jiray ayaa ahayd mid caan ku ah ganacsiga daroogada iyo baandada (gang). Waxaan doonayay inaan wax ka qabto oo la hadlo booliska laakiin uma malayn inaan saas samayn karo arimo badan awgood; luqadda oo igu adkayd, anniga oo aan ogayn cidda lala xiriiro, inay suura galtahay in lala xidhiidho booliska. Si dhakhso ah waxa uu bilaabay in si joogta ah oo aad ubadan loo baadho taasoo isaga ku keentay saamayn yar. Jawaabtaydii waxay ahayd inuu guriga gudihiisa aanu dhaafin intii suurogal ah ee ugu badan taa soo uusan jeclaan. Dib hadii aan u jaleeco, waxaan qabaa in taasi isaga dhankale wax uga muuqdeen. Intii uu kulliyadda u socdaali jiray way sii dheeraatay oo wuxuu bilaabay inuu waqti dheeraad ah la joogo wiilal ka waa weyn oo aan u maleeyey inay ku lug lahaayeen dembi.*

*Waxaan u tegey booliiska si aan u weydiiyo in ay wax ka qabtaan, waxay ii sheegeen in aanay waxba ka qaban karin balse waxay igula taliyeen inaan muddo dhowr maalmood ah dibada u eryo. Taasna waan sameeyey, laakiin waa uu soo noqday xaaladuna way ka sii dartay oo kaliya.*

*Mid ka mid ah saaxiibadiis ayaa la tooriyeeyay, wiilkayguna waxa uu maqlay in qof ka wax tooriyeeyay uu isagana raadinaaayo. Maalintii ku xigtay ayuu mindi qaatay. Waxa lagu sameeyay joojin baadhis. Sidaas ayaa boolisku ku sii bartay si joogto ah oo ka badan sidii hore ayaa loo baadhay oo loo xiray. Hadda waxa uu yahay 18 ku jira xabsi, Markii ugu horaysay ee la xiray ayaan u tegey booliska, waxaan rabay inaan qoro qoraal aan rajeynaayey in uu ka caawin doono wiilkayga kiiskiisa. Waxay iggu yidhaahdeen taas ha samayn  kiiskiisa uun bay wax udhimaysaaye. Ka dib markii ay marar badan igu yidhaahdeen kuma caawin karo gacana inaan siiyo wiilkayga ii ogalaan waayeen, waxaandareemay in boolisku dan arinta ka lahayn markaas ka dib isku maan dhibin iyaga".*

Joojin baadhistu waa awood bilays oo u ogolaanaysa inay joojiyaan shaqsiyaadka haddii ay arkaan sabab ay uga shakiyaan inay siddaan wax sharci darro ah ama mamnuuc ah (xaaladaha qaar shaki looma baahna, eeg bogga 2aad wixii macluumaad dheeraad ah).

Marka awoodan si habboon loo isticmaalo, waxay sahlaysaa in wax yaalaha khatarta ah lala marin dariiqa iyo sugitaanka amnigeena. Nasiib darro boolisku had iyo jeer ma u isticmaalaan awoodan si cadaalad ah ama si wax ku ool ah uma sugto aminaga bulshada. Marka loo isticmaalo si ixtiraam darro ah iyo sabab aan fiicnayn, joojin baadhistu waxay sababi karaa dhibaato weyn. Wuxuu ku yeelan karaa nafsiyan raad qoto dheer oo ku saabsan qofka la baadhay, qoysaskooda iyo bulshadaba .Waxa kale oo ay abuuri kartaa xiisad u dhaxaysa bilayska iyo bulshada, taas oo keeni karta cadho iyo rabshado dhab ahaan amaankeena naaqusaaya.

Waxaan u samaynay hagahan si looga hortago dhibka joojin baadhistu keeni karto. Caruurteena oo xiriir dhexmaro booliiska wuxuu noqon karaa mid werwer iyo cabsi ah. Hagahan waa qalab loogu talo galay fahmida joojin baadhista qoys ahaan.

## Waa maxay ujeeda hagistani?

Xalada joojin baadhistu waa arin cabsi iyo argagax ku ridi karta ilmo kasta ama qof dhallinyaro ah. Qaar badan oo iyaga ka mid ahi waxay ku sheegeen inay joojin baadhistu tahay mid handadaad iyo ceebayn ah. Waa carqalad wax u dhimi karta wax qabad maal meed kooda iyo dadka dhalin yarada ah oo dareemi kara xasilooni daro.

**Hagistani waxay:**

- kuu sharxi waxa dhaca inta joojin baadhitaanku socdo
- muujinaysaa waxyaabaha sida ilmahaagu joojin baadhay la kulmi karo
- dulmaraysaa waxii aad labo diinuba ka fili lahaydeen booliska
- ku siinaysaa fikrado ku saabsan sidii aad wada hadal ugula yeelato ilmahaaga arimaha kusaabsan joojis baadhista
- ku siinaysaa fursado sida loo muujiyo walaac iyo raadinta talo

## Maxay joojin baadhistu u tahay arin muhiim ah

Waxay joojin baadhistu saamaysaa kumanaan dadka dhallinyarada ah ee UK sanad kasta. Intooda badan waxay noqon doonaan qaar aan waxba galabsan oo wax  edeb darro  ama dembi samayn, oo aan lahayn taariikh ku lug leh hawlo dambi. Waxaa muhiim ah in la

ogaado in ilmahaaga la joojin baadho, waxay u badan tahay inaanay khaldamin, manna tilmaamayso inay khalad ka iyagu leeyihiin iyo edeb xumo toona.

- England iyo Wales waxaa jiray 539,788 joojin baadhitaan sannadkii hore (2014-2015) [1]
- London oo keliya, ugu yaraan 50,071 oo caruur da'doodu ttahay 19 jir ama ka yar  ayaa joojis baadhitaan Metropolitan Police Service ku sameeyey sannadkii la soo dhaafay (2014-15) taasoo 34% wadar ahaan guud noqonaysa [2]
- Intaas oo tirooyinkan ah, qaran ahaan mid ka mid ah toddobadii oo kaliya  ayaa  joojn baadhistani keena keentay in la xiro

Joojin baadhistu waa awood keenta qaybsanaan, waxayna leedahay taariikh dheer oo keenta xiisado iyo dhaawac ka dhex aloosma xiriirka u dhexeeya bulshada madow iyo qowmiyadaha laga tirada badan yahay iyo booliska UK. Kalsooni darroda iyo xanaaq u qabka boolisku waa wax caadi ku ah dadka Soomaaliyeed oo ay sabab u tahay cadaalad darro iyo ilaalo munaasab aan ahayn oo ay la kulmaan, oo ay ka mid yihiin beegsasho dheeraad ah oo dhawaanahan bulshada Muslimiinta loogu maro dadaalloda la dagaalanka xagjirnimada taasoo loola dhaqmo dhallinyarada Muslimiinta si tuhun ku salaysan.

Dhibaataynta garowshiinyo la'aanta ee joojin baadhista ayaa caado ahaan  abuura kacdood shacab iyo munaasabaddo rabshado baaxaddo weyn leh wata, sida kuwa dhacay 1980 nadii iyo kii dhawaan dhacay 2011kii.

- Guud ahaan England iyo Wales, dadka madow afar jeer ayay ka badan tahay inta la joojin baadho dadka cadaanka ah.
- Ma jirto cadaymo muujinaya in dadka madow galaan dembiyo ka badan mid ka badan ka dadka cadaanka ahi falo.
- Waxaa kale oo caadi ah  in layska joojis baadho qofka si joogta ah, **xitaa haddii aan waxba laga helin**.

Booliska UK inta badan waa la hadlaan xubno ka tirsan dadweynaha iyagoon ugga shakisanayn inay sameeyeen wax qalad ah. Waxaa laga yaabaa boolisku inay dadka la yeeshaan wada hadalo caadi ah oo ku saabsan waxa ka dhacaya meesha ay joogaan oo waxaa lagu dhiirigelinayaa inay dhex galaan bulshada. In lagugu arko iyadoo boolisku kula joogo maaha wax ceeb ah mana caddaynayso inay dhacday dhibaato.
Waalidiinta Soomaali qaar ka mid ah, oo aanu la hadlay waxay noo sheegeen inay aadaan booliska hadii ay ka walaacaan dhaqanka ilmahooda iyo hadii ay caawimo ugga baahan yihiin siddii ay u edbin lahaayeen caruurtooda. Tani ma aha ujeedada boliiska UK ee waxay tahay inay la hadlaan bulshada degaankaooda ama shaqaalaha dhalinyarada marka hore si aad u ogaato in ay ku caawin karaan, waxa kale oo laga yaabaa in ay awoodaan in ay kuu tilmidoonaan adeegyada maxaliga ah.

## Waamaxay joojin baadhistu?

Halkan waxaan ku sharxi doonaa awooda ugu weyn ee booliiska ee u banaan inay ku joojis baadhaan shakhsiyaadka.

Awooda joojin baadhistu waxay ubaahan tahay "tuhun macquul ah".

Qaybta 1aad ee PACE: Tanoo inta ugu badan la isticmaalo waxay u baahan tahay in askariga bilayska ahi tuhun caqli gal ku salaysan qofka ku tuhmo inuu sito wax sharci darro ah ama mamnuuc ah oo ay ku jiraan (a) daroogada (b) hub ama (c) hantida la soo xaday (d) shay loo isticmaali karo in ay galaan dembi (boolisku tan waxay ugu yeedhaan "socdaal qalabaysan").

Qaybta 43aad: waa awood kale oo ushaqeeya si la mid ah marka laga reebo booliska oo isku daya inay eegaan in shayga loo isticmaalaayo fulinta, diyaarinta ama inay u faa'iideyn karto fulinta fal argagixiso.

"Tuhunka macquul ah" ee bilayska looga baahan yahay waa inay ku saabsan tahay shaqsi gaar ah oo ay doonayaan inay baadhaan. Tusaalooyin ka mid ah sababaha aan la aqbali karin waxaa ka mid noqon kara;

- Socodka kooxaha badan
- Raadinta "sida dambiile" ama kaliye "tuhun"
- Joogista meel dembiyada ka dhacaa sarayso
- La xadhiidh dambiile la yaqaan ama laga shakisan yahay

**Joojin baadhista aan u baahneyn awoodaha "tuhun macquul ah."**

Qaybta 60aad: Tani waxaa laga fulin karaa meel ka badan meel gaar ah, sida beerta dadweyuhu ku nastaan ama labo ka mid ah waddooyinka, ilaa 15 saacadood haddii booliska macquul ahaan rumaysan yihiin in rabshadaha halista ah meeshaas laga yaabo inay ka dhacaan, ama in dadka meeshaas joogaa ay hub khatar ah sitaan.

Bilaysku way baadhi karaan qof kastoo ku sugan goobtaa iyagoon u baahnayn wax tuhun macquul ah. Qodobka 60aad waxaa loo isticmaalaa si aan joogta ahayn oo ka yar sidii hore loogu adeegsan jiray iyo in ugu badnaan lagu soo rogay dibad baxa, mahrajaano (xaflad shacbi oo leh ciyaaro) iyo dhacdooyinka waaweyn ee isboortiga , haddii rabshado laga filaayo.
**Qaybta 47a waa awood ah la-dagaallanka argagixisannimada oo u shaqaysa si la mid ah sida a Qaybta 60aad.**

Waxaa jira laba nooc oo kale oo awoodaha joojinta oo u shaqeeya



[1] Home Office Police Powers and Procedures, England and Wales, year ending 31 March 2015
[2] Metropolitan Police Stop and Searches Monitoring Mechanism, November 2014 - October 2015. Suurtogal ma aha in la helo tirooyin gaar ah oo loogu talagalay carruurta (da'doodu tahay 17 sano iyo waxii ka yar) booliiska Metropolitan waxay xaga da'da  isticmaalaan  macluumaad balaadhan oo qudha

siyaabo kala duwan. Jadwalka 7 (awooda ah la-dagaallanka argagixisannimada waxaa loo isticmaalaa xarumaha gaadiidka sida madaarada) iyo Qaybta 163 ee Sharciga jidadka ah (awood ah in ay joojiyaan gaadiidka). Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xeerarkan mid ka mid ah, booqo *www.stop-watch.org*

**Maxaa dhacaya inta lagu jiro joojin baadhitaanka?**

Bilaysku waa baadhi karaa qof iyo gaariga ay ku safrayaan haddii ay mid ku safrayaan. Jeebkooda, dharka ay dusha ka xidhan yihiin iyo shandadaha ay sitaan waa la baari karaa, waxaana la weydiin karaa in ay saaraan huga ama dharka ay dusha ka xidhan yihiin sida jaakadaha iyo cimaamadaha. Baadhista noocan ah waa laga fulin karaa meelaha dadweynaha.

Haddii booliisku ay doonayaan in ay baadhis intan dhaaf siisan sameeyaan (waa in sidoo kale cuskadaan sababo macquul ah oo u qiil u samaynaysa baadhitaan dheeraad ah) ama haddii ay doonayaan inay ka saaraan waxyaabo diiniyan ah waa in baadhista noocan ah lagu sameeyo meel gaar ah.

**Ka waran hadii ilmahayga la joojiyo laakiin aan la baadhin?**

Tan waxa loo yaqaan 'stop and account' ama "joojis aan baadhis keenin". Ma aha awood boolis iyo mid ilmahaaga la xiray, laakiin weli waa arin dareensiin karta cabsi. Boolisku waxba ugama tuhunsana ilmahaaga, waxay kaliya ay weyddiinayaan su'aalo ku saabsan dhaq dhaqaaqyadooda sida; Waa maxay waxaad samaynayso? Xaggee baad aaday? Halkee baad u socotaa? Waxii dhaafsisan intan ee dheeraad ah tusaale ahaan macluumaadka ku saabsan dadka kale, ama hawlaha gudaha Masjidka ah, waa in aan la weydiinin oo aanay qayb ka ahaa joojis aan baadhis horseedin.

## Sida loo weydiiyo ilmahaaga waxyaabaha ku saabsan joojin baadhitaanka

In la joojiyo, oo la baadho dhalin yarada, waxay noqon kartaa arin keeni karta inay dareemaan sharafdhac qoto dheer oo ku reebi kara dareen xaqsoor la'aan iyo caalwaa. Waxaa taas ka sii daran, dhalinyaro badan ayay ku adagtahay in ay ka wada hadlaan waalidkood wax yaabaha ku dhacaya dhowr sababood owgood. Waxay u malaynayaan in waalidku ay u cadhoon doonaan, uggana shakiyayaan dhaqan xumo boolisku ku barto. Laakiin ay sidoo kale la walaacaan in aad u cadhoon doonto  booliska oo aad arinta wax weyn ka dhigto. Qaar ka mid ah wiilasha waxay is odhan karaan adkaysoo 'nin iska dhig'.

Sidaas daraaddeed ha la yaabin haddii ilmahaaga aanu kuu sheegin haddii la joojin baadhay, ama haddii aysan rabin inay ka hadlaan arintaas.

Inkasta oo aanay fududayn ka wada hadalka arintani, waxaa fiican inaadan sugin ilaa inta ay wax dhacidoonaan, iyadoo aanu ilmahaagu si buuxda u diyaarsaneyn oo la joojis baadho waxay kordhisaa in ilmahaaga saamayn xun ku reebto. Si deggan oo aan go'aan ahayn oo aad ula hadashaa ilmahaaga la joojis baadhay waxay u noqon kartaa caawimo weyn, laakiin marka hore waaa inaad ka kasbato aaminaad iyo kalsooni;

- Sii fursad ay iyagu iskood uga hadli karaan: Waxaa laga yaabaa in aad dooneyso inaad kaartuunka dhuuban ee la socda hagahan ka bilowdo wada hadalka, ama meel gaar ah udhigto ilmahaaga si uu isagu akhristo.
- Dhacdooyin ama qisooyin kaa soo maray arintan la wadaag: Haddii lagu joojin baadhay la wadaag xusuustaada, ama u sheeg tusaalooyin marar aad xaqsoor la'aan la kulan tay yaraantaadii.
- Tix geli dareenkooda: waa caadi inay  dareemaan niyadjab iyo culays aad u weyn
- Eedaynta jooji: waxaa laga yaabaa in aad dooneysid in aad u sheegto  inaanay khaladka iyagu lahayn oo haba yaraatee aanay wax iyaga ka sheegayn tahayna dhacdo ku dhacda dad badan oo dhallinyaro ah

Waxa kale oo laga yaabaa in aad rabto in aad booqato *www.stop-watch.org* si aad u aragto sida la joojis baadhista loo isticmaalo meesha aad degan tahay.

## Yeelo istaraatijiyad ama xeelad

Waa fikrad fiican in ilmahaagu horey ulla yimaado qorshe loogu talagalay sidii uu ula tacaali la haayeen hadii ay la kulmaan arin joojis baadhis ah. Joojin baadhistu  waxay u dhici kartaa si lama filaan ah, wakhti kasta, meel kastana waa ka dhici kartaa – u diyaar garowga dheerida ah waxuu sababaa in ay si degdeg iyo amaan leh ula tacaalaan. Waxa ugu muhiimsan waxay tahay in la joojiyo in xaaladdu ka sii darto, iyo sidii loo yarayn lahaa saamaynteeda.

Bogga Y-Stop *(www.y-stop.org)* waxaa ka buuxa macluumaad laga bilaabo xuquuqdaada joojis baadhista, talooyin ku saabsan akhaalqda ay ku maarayn karaan hadal ahaan, sheekooyin u gaar ah dadka dhallinyarada ah kuna saabsan aragtidooda iyo macluumaad dhalinyarada kale loogu talo galay. Macluumaad faahfaahsan "Kaadhka Baadhista Search Card" oo ay la socdaan talooyin ku saabsan sida loola macaamilo joojis baadhista ayaad ka heli karaa oo Ingiriisi iyo Soomaali ah. Ilmahaaga waa in ay ogaadaan in aanay ahayn inay ka jawaabaan su'aal kasta oo la weydiiyo, waana caadi inay  booliska weydiiyaan waxii aanay hadba

fahmin booliiskana waxaa laga filayaa inay u dhaqmaan si hufan oo waafaqsan sharciga.

Iyadoo ilmahaagu yaqaano hab wada hadal, ogna waxuu filan karo, garan karana dabeecad kasta oo aan macquul ahayn, ilmahaagu waa in ay dareemaan inaanay go'doonmin oo noqdaan kuwo u tababaran in ay xalin karaan la kulanka booliska.

## Ka dib baadhista

Haddii ilmahaagu la joojiyey, waxaa laga yaabaa in aad rabto in aad waydiiso xoogaa su'aalo ah si loo hubiyo in saraakiishu raacday habka saxda ah. Liis ka waxaa ka mid ah:

- Sarkaalku ma sharaxay sababta ay u joojiyeen
- Sarkaalka ma dhahay waxay raadinayeen
- Sarkaalka ma tusay aqoonsi cadaynaaya ciday yihiin
- Sarkaalku ma sharaxay sharciga ay isticmaalayaan si loo sameeyo joogsi baadhis
- Sarkaalka ma siiyey ilmahaaga rasiidh baadhitaaneed. Tani waa caddayn muhiim ah in joogsigu dhacay, haddii aad rabto inaad cabasho ka dib gudbiso, askariguna waa in ay diiwaan geliyaa dhammaan macluumaadka kor ku xusan.

Kaadhka joojin baadhista Y-Stop[3] waxuu bixiyaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan macluumaadka ay tahay in booliisku ku siiyaan marka lagu joojiyo iyo sida ugu habboon ee ay tahay inay kuula hadlaan.

## Gudbinta walaacaaga

Xusuusnow in ay haboon tahay inaad talaabo ka qaado haddii adiga ama ilmahaaga loola dhaqmay si xaqsoor la'aan ah ama la idinka xanaajiyey, cabashada adigoon eegayn yaraanteeda uma baahnid inaad arinta si yar u dhaaftid.

Cabashada ku saabsan booliska waxay u eekaan kartaa mid keenta colaad iyo dhib badan laakiin ma jirto sabab aad uga cabsato inaad gudbiso cabashadaada, samayn raad xunna adiga ama qoyskaaga toona kuguma keeni karto, khibradayada tani dhif bay u dhacdaa.

Hadii ilmahaagu rumaysan yahay in si khalad ah loo baadhay, waxaa jira dhow nidaam oo adkeeyey ka cabanaya booliiska kormeerka – haddii aad doorato in aad u isticmaasho.

**1. Y-Stop app**
Y-Stop ayaa soo saaray app (aalad) u ogolaanaysa in dadka dhallinyarada ahi cabashooyinkooda u diri karaan siyaabo kala duwan. Haddii ay rabaan inay u cabtaan booliiska, waxay buuxin karaan su'aalo kooban oo ku saabsan waxii dhacay taasoo si toos ah ugu dhici doonta booliska iyo aalada Y-Stop oo heli doonta nuqul si ay gacan sadexaad ahaan ula socoto cabashada. Sidoo kale waxaa jira fursad aalada Y-Stop oo kaliya cabashada loogu gudbin karo, halkaas oo khubaro iyo gar-yaqaano ku siin karaan taageero iyo talo haddii ay haboon tahay kuu sheegi kara in talaabooyin dabo gal ah la qaadi karo. App ama aaladan ayaa sidoo kale suura gelinaysa in isticmaaluhu duubi karo joojin baadhitaanka marka lagu samaynaayo iyo inuu muuqaalka uu duubay si toos ah ugu diri karto Y-Stop.

**2. Warcelin qarsoodi ah**
In badanoo ka ka mid ah ciidamada booliska waxay fursad u siiyaan dadweynaha in boggooda internet-ka ay ku gudbinkaraann si qarsoodiiyagoo buuxinaya foomka jawaab-celinta ee boggooda internet-ka.

Sidoo kale waxaa jira hab gooni ah oo luugu macag daray 'Qiimee shaqada bilayska ee xaafadaada' oo ciidamada booliska qaar ka mid ah oo ay ku jiraan ciidamada bilyaska ee Wales, West Midlands and Leicestershire ay lee yihiin oo kuu suura gelinaya inaad dhaliili iyo amaan ugu gudbin karto boggooda internet-ka.

**3. Waxaad xildhibaan kaaga u qortaa waraaq**
Xildhibaankaagu su'aalo waa uu weydiin karaa gollayaasha deegaanka (iyo sidoo kale baarlamaankaba). Waxaad kaloo qori kartaa shakhsi ahaan wax yaabaha ilmahaagu waayo aragnimo kala kulmay arinta joojin baadhista ama waxaad si guud ahaaneed ugu gudbin kartaa dareen ku aadan isticmaalka joojin baadhka ee meesha aad degan tahay ka dhaca. Waxaad faahfaahinta xiriirka MP-gaaga ka helaysaa *www.writetothem.com*

**4. La xiriir kooxda la socadka (arimaha joojis baadhka) deegaanka**
Kooxahan bulshada ee la socda bilayska shaqadooda waxay ka warqabaan adeega bilaysku u fidiyo deegaanka. Waxayna ka kooban yihiin xubno ka tirsan dadweynaha, doorkooduna waa in ay la socdaan arima la xidhiidha joojis baadhista deegaankooda, oo ay ku jiraan cabashooyinka, isudhignaan la'aan toodda iyo heerka xidhistu gaadhsiisan yahay.

Haddii aadan ku qanacsanayan habka bilaysku kuula macaamilay, kooxda la socodka deegaankaagu waxay kari karaan inay fiira gaara dhacdada ku sameeyaan si toos ahna ugala xisaabtamaan bilayska deegaanka.
Bogga internet-ka ciidamada bilyaksa ee deegaanka ayay tahay inay leeyihiin macluumaadka xiriirka ee kooxaha la socda bilayska

[3] Booqo www.y-stop.org/resources si aad u dalbato nuqulo ku qoran Ingiriisi iyo Soomaali

shaqadooda, ama waxaad la xiriiri kartaa StopWatch si ay kaaga taageeraann helista kooxda deegaankaaaga.

**5. Samee cabasho rasmi ah**

Xaaladaha qaarkood, cabasho rasmi ah oo ka dhan ah sarkaalka ayaa haboon in la sameeyo. Tusaale ahaan haddii xoog dheeri ah la isticmaalay, ama ereyo cunsuriyad ama takoor, ama haddii saraakiisha ku lug leh bixin sharraxaad lagu qanci karo sababta loo joojin baadhay iyo haddii la qaawis baadhay (strip search) ilmahaaga.

Gudbinta cabasho ka dhan ah askari bilays ah waa howl culus. Runtuse waxay tahay haddii aad sii tabaabushaysato una diyaar garowdo dib u dhacyo mararka qaarkood.in aad leedahay fursad fiican oo keeni karta natiijo fiican. Waxaa dhici karta in sarkaalka booliska ugu horeeya ee aad dacwaaada u gudbiso ku dhayalsado iyo inaad u baahato ka war dooninista baaritaanka.

Waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo su'aalo sida "ilmahaaga ma xilli dambuu habeenkii dibada maraayey? Ama ilmahaaga asxaabtiisu ma waxay ku xidhan yihiin shaqsiyaad bilaysku yaqaan. Su'aalaha nooccan ah waxaa loogu talagalay in walaac ku galo oo aad shakido. Is deji oo diiradda saar inaad ka hadasho oo qudha sababaha aad u cabanayso. Xasuusnow ma aha ilmahaaga ama waalidnimada in wax laga sheego laakiin waa fursad diirada lagu saarayo sarkaalka booliiska ah.

**Caqabadaha luuqada marka lala macaamilaayo bilayska**

Hadii aadan aqoon sida af Ingriisiga loogu hadlo ama loo qoro taas mac naheedu maaha inay kaa horjoogsato la xidhiidhista booliska. Boolisku waa in ay oggolaadaan foomka cabasho qoraal af kuu doonto ha ku qoraatee, sidaa darteed haddii aad cabashadaada ku gudbinayso af Soomaali, dusha kaaga qor foomka. Waxay heli doonaan turjumaan ka caawin doona fahmida cabashada iyo jawaab celinta booliska.

Mabda'ani waxuu khusaysaa dhammaan isgaarsiinta booliska ,tusaale ahaan haddii aad wacdo lambarka 101 (khadka aan deg-deg ahayn). Haddii aad u sheegto qofka kula hadlaaya inaad Soomaali qudha kula hadli karto, waxay kuu gudbin doonaa qof turjubaan ah ama waxay kaa qaadanayaan macluumaadkaaga si turjubaan dib kuugu soo waco.

**Si ashtako rasmi ah loo sameeyo tusaha oo dhamaystiran waa sidan soo socota.**

## Habka cabashooyinka booliska

Waxaa jira nidaam rasmi ah oo lagu hubiyo in cabashooyinka ka dhanka ah saraakiisha bilaysku ay si buuxda loo baadho, waana in aad taageerto ilmahaaga inuu sameeyo cabashada. Waxaa jira saddex siyaabood oo aad tallaabooyin u qaadi karto, hoos ayay ku sharaxan tahay.

### 1. Cabasho rasmi ah u dir ciidamada bilayska deegaanka

**Yaa sameyn kara cabasho?**
Waad samayn kartaa cabasho haddii ay jirto:

- Anshax xumo kaaga timi askari bilays ah (laga yaabee in aad u malaynayso in ay kuula dhaqmeen is aan fiicnayn ama qalafsan)
- Anshax xumo uu askari bilays ahi kula kacay cid kale oo si xun kuu saamaysay
- Inaad joogtay goob bilaysku falay dhaqan aan haboonayn
- Ogolaansho aad ka hesho mid ka mid ah qaybaha kor ku xusan, si ay u sameeyaan cabashada iyaga oo ku wakiilanaya. **Waalidiinta iyo masuuliyiinta carruurta ka yar 16 uma baahna inay ogolaansho waydiistaan carruurtooda inay cabasho gudbiyaan.**

**Habka-samaynta cabashada**
Habka ugu fudud ee aad cabasho u samayn karto cabasho waa inaad aado saldhigga bilayska deegaankaaga adoo weydiinaaya inaad la hadasho Isbatoore (Inspector) – kani waa sarkaal sare oo mas'uulka ka ah saldhigga.
Si kastaba ha ahaatee, mararka qaarkood Isbatooraha waxaa laga yaabaa inaadan helin inaad cabashadaada si degdeg ah ugu gudbisid, sidaas darteed waa in aad sida laguula soo xiriiro codsataa in sida ugu dhaqsaha badan tilifoon lagugula soo xidhiidho. Xaaladaha qaarkood, sarkaal boolis ah oo darajo hoose leh ayaa dacwadaada u gudbin doona Isbatooraha.

Sidoo kale waxaa cabashooyinka ciidamada bilayska ee deegaanka loogu gudbin karaa telefoon ama adoo isticmaalaya foom online ah (khadka internet-ka).

Waa in aad samayso cabashodaada sida ugu dhaqsaha badan ka dib markii ay dhacdo dhacdada aad ka cabanayso, maxaa yeelay, in kastoo aanay jirin wakhti xaddidan, hadana waxaa boolisku go'aansan karaan in aanay qaban cabasho haddii wakhtiga ay dhacday ka soo wareegtay mudo ka badan 12 bilood.

Haddii aad doo nayso inaad cabasho ka badan 12 bilood gudbiso waa in aad sharaxdo sababta dib u dhaca keentay – booliisku waa tixgelin doonaan sharaxaada go'aana way ka qaadan doonaan hadii ay wax ka qaban karaan cabashada.
Cabashadaada waa inaad ku jiraan macluumaadka ugu badan ee suurtogalka ah, oo ay ku jiraan

- Maxaa dhacay
- Maxaa la yidhi, la samaysay, iyo cidee
- Haddii uu jiro cid marag ahayd iyo sida loola xiriiri karo
- Waa maxay caddaynta jirta ee waxyeello ama dhaawac, tusaale ahaan. sawiro / warbixino caafimaad

**Sidee iyo kuwee baa baadha?**
Isbatooraha ayaa kaa qaban doona cabashadaada oo qoraal ah hadii aad shikhsi ahaan u tagtid saldhigga booliska. Haddii aadan ku kalsoonayn ku hadalka afka Ingiriisiga waxaad ka xaysan kartaa saaxiib ama xubin qoyska ka tirsan si uu kuugu turjumo ama waxaad isticmaali kartaa adeega turjumaanada booliska (waxaa laga yaabaa in si degdeg ah boolisku kuu helin adeegyada turjumaan Soomaali ah oo ay dhacdo in lagu yidhaahdo soo laabo mar labaad ama telefoon laguu soo diro).
Cid baadha ayaa loo xilsaari doonaa inay si faahfaahsan u eegto dacwada waxayna ku siin doonaa jawaab qoraal ah oo buuxda. Waxay kuu sheegi doonaan wixii macluumaad dheeraad ah ee ay kaaga baahdaan, inta jeer ee aad ka filan karto xogwaran ku saabsan horumarka baaritaanka, sida go'aanka lagu gaadhay iyo waxay yihiin waxyaabaha suurto gal tahay ee ka soo baxay.

Cabashooyinka ku saabsan dhimashada, weerar halis ah ama dembiyda galmada waxaa loo gudbin doonaa Guddiga Dacwooyinka Booliska ee Madaxabanaan (IPCC) – hoos ka eeg wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ururkan.

## Natiijooyinka suurto gal ka ah

**Qaraar maxali ah ama deegaan**
Cabashooyin badan ayaa heer deegaan si deg deg ah wax looga qaban karaa iyadoon loo baahan baadhis qoto dheer. Tani waxaa ku jiri kara dhowr waxyaabood oo kala duwan, oo ay ku jiraan sharaxaad, raali gelin ama kulan sarkaalka dacwada laga sameeyey. Sida caadiga ah waa in aad ku heshiisaan qaraar heer deegaan ah, laakiin mararka qaarkood boolisku waa isticmaali karaa heshiiskan la'aantaa. Waxaad heli doontaa warqad ka socota ciidanka bilayska oo sharxaysa wixii xal maxalli ah iyo sidoo kale macluumaad ku saabsan sida rafcaan qaadashada haddii aadan ku qanacsanayn natiijada.
Hadii xal maxali ah loo isticmaalo dacwada ka dhanka sarkaalka

(kiisha) oo lagu hishiiyo wax talaabo ah lagama qaadi doono laakiin dhacdadaa diiwaanka ayaa lagelinayaa. Haddii **baaritaanka maxaliga ah** la fuliyo natiijadu waxaa laga yaabaa in ay noqoto siyaabahan soo socota:

**Haysasho la'aanta caddayn ku filan cabashadaada**

Go'aanka waxaa laga yaabaa inuu noqdo inaanay jirin cadaymo waafi ah oo caddaynaaya ama beeninaaya cabashadaada. Tani macnaheedu ma aha in aan lagu rumaysan.

**Hagaajinta / beddelid nidaamka ah**

Tani waa qirid in waxa aad ka cabatay uu iftiimiyay khaldanaa jidkii booliska guud ahaan, ama ciidan gaar ah wax u qabeen. Tani waxay markaas u horseedi doonaa in isbeddel lagu sameeyo nidaamka si aysan mar kale u dhicin. Go'aanku ma odhan doono inuu sarkaalka (kiishu) si khalad ah u dhaqmay ama u dhaqmeen, sida laga yaabo inay raacayeen nidaam xun sidaas darteed maysan ahayn  qaladkooda.

**Talaabo edbin rasmi ah ama maamul oo ka dhan ah sarkaal**

Tani waa qirid in sarkaalka (kiishu) u dhaqmeen si aan haboonayn iyo in loo baahan yahay in lagga qaado talaabo. Tani waxay u dhaxayn kartaa in loo diro tababar dheeraad ah ama dib-u- tababarasho iyo iyadoo shaqada laga eryo.

**Ugudubka Xaalada Adeega Ciqaab marinta ee Maamulka dambi (CPS) si loo helo talo ku saabsan ciqaab suurto gal ah**

Xaaladaha ha ugu halista badan, falalka sarkaalka (kiishu) ayaa laga yaabaa sidoo kale inuu yahay fal dembi ah – tusaale ahaan, ku xadgudubka jirka. Xaaladahan waxaa loo gudbin doonaa CPS oo go'aamin doona haddii ciddii la soo eedeeyay iyo ciddii maxkamad la saaraayo.

## Racfaano

Haddii aadan ku qanacsanayn jawaabta ka ciidanka bilayska, ama habka cabashada loola macaamilooday, waad ka racfaan qaadan kartaa go'aanka Guddiga Dacwooyinka Booliska ee Madaxabanaan (IPCC) – eeg hoose wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan

Waa in aad ogaataa in IPCC dib u eegi doona baaritaanka cabashada oo kaliya – oo aanay eegi doonin cabashoda asalkeedii.

Haddii ay go'aansadaan in aan cabashadaada si fiican loo baadhin waxay u sheegi doonaa sarkaalka booliska sare ee ciidamada ay khusayso waxayna u sheegayaan waxa ay tahay in ay sameeyaan oo ku saabsan cabashada. Haddii aad rafcaan kaaga aan la fulin, waxaad heli doontaa qoraal sharraxaya.
Qiimeynta IPCC waa mid aan la sii dacwoon karin. Tallaabada xigta waxay noqon doontaa inaad raadsato talo sharci oo ku saabsan a talaabo sharciga ah ee suuragal ahaan qaadi karto – hoos ka eeg wixii macluumaad dheeraad ah.

## 2. Udir cabasho rasmi ah Guddiga Dacwooyinka Booliska ee Madaxabanaan (IPCC)

Haddii aad dareento inay kugu adkaato inaad cabasho toos booliiska u dirto waxaad cabashadaada si toos ah uggu diri kartaa IPCC – tani waa guddi madax-bannaan.

IPCC waxaa lagala xiriiri karaa 0300 020 0096 ama waxaad tegi kartaa boga internetkooda oo ah *www.ipcc.gov.uk*

Si kastaba ha ahaatee, waa inaad ogaataa in xataa haddii aad cabashadaada si toos ah uggu gudbisid IPCC inay dhici karto inay dib uggu soo celin karaan ciidamada booliska ku habboon si loogu xalilo heer maxali ah.

Tani waa sababta kaliya ee heer gaar ah IPCC ulla macaamisho cabashooyinka badina waxaa ugu wacan in cabashooyinka lagu xalliyo heerka maxalliga ah iyo ciddii gaar ahaan dacwadu qusayso.

## 3. Talaabo sharci ah oo ka dhan ah booliska

Cabashooyinka madaniga ah qaar ayaa khatar ah oo haddii dacwad la hor geeyo Maxkamadaha ah lagu heli karaa magdhow. Caadatan waxaad u baahan tahay inaad marto nidaamyada cabashooyinka oo dhan iyo rafcaanka ka hor intaan talaabo kale la qaadin, laakiin waxaa haboon inaad la tashato gar-yaqaan. StopWatch way kaa caawin kara arrintan.

**Hab kale oo loo cabankaro**
Haddii aad dareento inay kugu adagtahay inaad inaad tagtid Saldhiga Booliska ee deegaankaaga ama la xiriirto IPCC, aalada app-ka ee Y-Stop waa hab kale oo lagu soo sheegi karo dhibaatooyinka aad booliska kala kulanto. Ku shubo (Download) app-ka Y-Stop moobaalada casriga ah si ay kuugu suurowdo inaad soo buuxi faahfaahinta  joojin baadhista inta aadan cabashadaada si rasmi ama qarsoodi ah booliiska iyo Y-Stop ugu dirin.

## Xusuus qoris

## Yaanu nahay

Y-Stop waa iskaashi u dhexeeya hay'adaha samafalka, qareeno, dadka dhalinyarada ah, shaqaalaha dhalinyarada, kooxaha bulshada iyo ururada warbaahinta, oo uu hoggaaminayo samafalka Release iyo StopWatch. Waxay bilaabatay sanadkii 2013ka markii aanu bilaabnay booqasho ku tagnay xarumaha dhallinyarada ku kulmaan, kulliyadaha iyo dugsiyada London si aanu sifiican u fahano waayo aragnimada dadka dhallinyarada ah ee booliska iyo inaanu ogaano waxa aan kari karo inay wanaajinayso xaaladooda.

Waxaan ogaanay in joojin baadhistu ay ku reebto dadka dhalinyarada ee UK niyad jab, cabsi iyo jahwareer. Waxay sidoo kale ku reebtaa bulshada saamayn aad u xun s; shaki, dayacaad iyo horka-nac ay si joogto oo baabi'isa kalsoonida iyo aaminaada booliska u hayaan. Y-Stop waa xalkayaga. Iyada oo loo marayo tababar iyo qalab waxay kordhinaysaa kalsoonida iyo xirfadahooda ay kula macaamilayaan joojin baadhitaanka, waxa ay yaraynaysaa halista ka imankarta colaad iyo dhibaato ka dhalata xiriirka ay la yeeshaan booliska.

Waxa kale oo ay hagaajinaysaa xiriirka u dhexeeya dadka dhallinyarada ah iyo booliska iyo iyadoo bulshada wacyigelin ku saabsan joojin baadhista u ah.
Tan ugu muhiimsan waxay tahay waxay taageertaa dadka dhalinyarada inay u sahasho inay xaaladaha adag hab wanaagsan ku qaabilaan. Kooxaha dhalinyarada ee aanu lasoo shaqeynay ayaa hormuud ka ahaa mashruuca oo dhan, go'aan iyo nashqad kasta oo dhan oo ka mid ah waxyaabaha aanu doonaynay sida aan doonayay waxaa u sameeyeen run ahaantii waxay doonayaan inay isticmaali karaan.
Waa mahadsanyihiin xubanha ka tirsan Hackney Quest, Octavia Foundation's BASE, SE1 United, Skyway Blue Hut, Waltham Forest YIAG and Youth Futures oo xirfadahooda ku qabtay shaqoooyin adag. Y-Stop waxay jeclaan lahayd inay u mahadceliso Somali Heritage Academic Network Ltd oo u tarjumay hagahan af Somali.
Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Y-Stop iyo adeegeeda booqo *www.y-stop.org*

contact@y-stop.org
Helpline: 020 7324 2989

**A Release Initiative in partnership with StopWatch**
www.release.org.uk
ISBN: 0-904932-38-9
© Release Publication 2015
This guide has been funded by Open Society Foundations'
At Home in Europe project.